JACEYL DHOOF GALAY





W/Qoray:Feysal Maxamed Cabdiraxmaan

JACEYL DHOOF GALAY

Tani waa qiso dhab ah oo ku dhacday wiil dhalinyaro ah oo ku noolaa magaalada muqdisho sanadka markuu ahaa 2016.

Wiilka ayaa ahaa mid ku nool degmada Hodan gaar ahan jaamacadii hore ee gahayr waxa uuna wax ka baran jiray mid ka mid ah iskuulada ku yaalo aga gaarka suuqa bakaaraha.

Wiilka ayaa ahaa qof fur furan oo kaftan badan oo ay asxaabtiisa ka heli jireen kaftankiisa dabiiciga ah.

Malin maalmaha ka mid ah isaga oo sugaaya gaadiidka dadweynaha kuna sugaaya isgoyska sheikh cali suufi qoraxduna ay ahayd mid kulul abaara 12:30 duhurnimo kana soo baxay iskuulkii uu wax ka baranaaye mudo badan markii uu sugaaye gaadii ayaa uu waxa uu helay gaadiid buuxo oo u socdo halkii ay xaafadiisa

aheyd ayaa waxa uu go'aansaday in uu gaarigii qabsado si uu mesha uu rabay u gaaro balse marka uu gaarigii gaaray isgoyska tarbuunka ayaa ka hareen qaar ka mid ah rakaabkii saarnaa gaariga sidaas ayaa waxa uu ku helay boos oo uu fadhiisto balse booska uu fadhiisan rabay dhinaciisa bidix waxaa fadhisay gabar aad u qurux badan oo lagu magacaabi jiray Muno wiilkan waxaa lagu magacaabi jiray Muniir.

Wiilkii waxa uu ahaa mid kaftan badan isaga oo dhoola cadeynaya ayuu gabadhii ku yiri "ma fariisan karaa abaayo"

Gabadhii ayaa ugu jawaabtay haa dabcan waad fariisan kartaa.

Wiilkii halkii ayuu ka sii watay hadalkiisii iyo kaftankiisii isaga oo gabadhii la sheekeysanayo ayaa uu ku yiri" Fadlan ma ii sheegi kartaa

magacaaga iyo xaafada aad degantahay abaayo.”

Gabadhii ayaa ugu jawaabtay si niyad furan “Magaceygu waa Muno waxa aana deganahay xafaada ku dhaw aaga gaarka jaamacadii hore ee Gaheyr.”

Wiilkii ayaa ku yiri daris ayaanba nahay abaayo.

Gabadhii ayaa ku tiri haa waayo dhoor jeer ayaa kugu arkay meshaas adiga oo asxaab badan la socdo oo banooni u socotiin.

Ayaga oo Sidii sheegadii u wato ayaa waxaa la soo garay halkii ay u wada socdeen.

Wiilkii ayaa ku yiri ka waran abaayo hadii aan isa soo xariirino sidee u aragtaa.

gabadhii ayaa ku tiri waxba kama qabo, Halkii ayaa lagu kala qaatay numberadii la iska soo xiriirin lahaa.

Markii la garay habeenkii saacaduna ay tahay 9:30 habeenimo ayaa gabadhii soo wacday wiilkii durba taleefanka ayuu ka qabtay .

Cabaar markii la iska warestay xaalada ayaa wiilkii gabadhii ku yiri "maxaad qabataa abaayo "

Gabadhii ayaa ugu jawaabtay waxa aan ahay ardayad, waxaana dhigtaa macad ku yaaal xaafada waliba fasalka 2aad ee dugsiga sare, adi ma waxaa wax ka barataa mesha aad gaariga ka soo raaceysay.

Wiilkii ayaa ku yiri haa abaayo waxaana ahay fasalka 2aad ee dugsiga sare.

Ka dib markii isbuuc la sheekeystay ayaa wiilkii gabadhii u sheegay in uu u qaday dareen waali ah kaasoo mar waliba ku riixaayo inuu codkeeda maqlo iyo in mar walibo la joogo.

Gabadhii ayaa iyadana u sheegtay in si la mid ah ay dareen ugu qaaday waliba ay rabto in ay jacayl sameystaan.

Markii ay midba midka kale u soo bandhigay dareenka gaarka ah oo u qaaday ayaa waxa ay ku balameen in ay hore u sii wataan jaceylkooda curdunka ah.

Malin maalmaha ka mid ah ayaa ay gabadhii ka codsadaygacliyahaydii in dalxiis wada aadaan maadama ay iskuulka fasax yahay oo ay imtaxanka termka u dhamaday, waxa ayna go'aan sadeen in dalxiis u adaan xeebta liido.

Balse waxaa ka dhacay layaab ka dib markii ay mudo daqiiqado ah deymo waqtiga ugu dhamaaday , waayo waxa uu ahaa kulankooda kowaad markii ay xiriir wadaag noqdeen.

Intaas ka dib ayaa jaceylkooda waxa uu garay heer ay ilbiriqsi is moogaan Karin.

Gabadhii ayaa wiilkii ku tiri " Ma awoodo in aan ku moogaado xitaa ilbiriqsi waayo mar walibo waxa aan rabaa in aan kula joogo sided u aragtaa hadii aan hal meel wax ku barano si aan isku waheshano,"

Wiilkii ayaa ugu jawaabay" Aniga xitaa sidoo kale ma awoodi in aan ku moogaado sidaas darteed iskuulkaga ayaa ku soo biiraa waayo xaafada ayuu ku yaala"

Sanad dugsiyeedka cusub ayuu wiilkii ku soo biiray iskuulkii,balse nasiib daro labo fasal oo kala ah A iyo B ayee kala noqdeen.

Intaas ka dib wiilkii ayaa xakameyn waayay naftiisa waayo wax walibo iyada ayuu ku soo koobay waxa uuna gabay kalintiisa waxbarasho waayo mar walibo iyada ayuu la joogaa.

Arintooda waxaa ogaaday dhamaan ardayda iskuulka, macalimiinta iyo maamulka waayo

mar walbo waxa ay fariisan jireen meel aan ka fogeyn barxada iskuulka oo uu darjiin ku yaale.
Habeen habeenada ka mid ah ayaa gabadhii wiikii ku casuumtay casho sharaf isgana waa uu ka aqbalay,
Wiilkii ayaa si wanagsan loogu soo dhaweeyay gurigii,
Waxa uu jawi fiican ku qaatay casho sharaftii.
Markii ay arinta halkas ma resay ayaa wiilkii gabadhii ku yiri waxa aan kugu talagalay hadiyad qaali ah.
Gabadhii ayaa ku tiri hadiyad noocee ah.
Wiilkii ayaa tusay gabadhii gacantiisa bidix taas oo ay ku qoran tahay magaceeda oo lagu liifaaqay caalamda jaceylka.
Gabadhii ayaa fajac iyo yaab dhabanada u qabsatay oo ay garannweysay waxa ay ku qiyasto jaceylka xad dhaafka ah oo uu u qaaday.

Wiilkii ayaa ugu mahad celiyay casho sharaftii iska oo yiri:

"Munooy midabkaaga gaarka ah iyo munada wacan baa kaga dortay dhamaan hablaha asaagaa.

Munooy hoos baa ii tahay oo aan cadceeda kaga dugaal sado.

Midkaa oori u noqotaa asaagiis wax dheeraday Mahurankii nafteeda oo ridaa jaclaay marna ha iga foogaan."

Intaas ka dib gabadhii ayaa bilowday in ay barto familkeeda oo dhan.

Balse wiilkii ayaa mesha ka wayay Aabbaheed. Malintii xigtay ayuu wiilkiii weydiyay gabadhii oo uu ku yiri " Xalay Aabbe ma aanan arkin ". Gabadhii ayaa ugu jawaabtay" Aabbe waxa uu ku nool yahay qurbaha"

Wiilkii ayaa ku yiri waa ay wanaagsantahay.

Markii ay lamaanayaasha wada qaateen waqtiyo qurux badan waxaa bilowday malmihii mugdiga kadib markii gabadha Aabbaheed ku soo war galiyay in uu rabo in uu u ka xeeyo halka uu isga ku suganyahay inta ka sii horeysana ay joogi doontodalka Kenya si loogu dhameeyo fiisaha ay ku bixi laheed.

Gabadhii ayaa garan weysay waxa ay sameyso iyo waxa ay kala kulmi doonto hadii ay saaxibkeed u sheegto arintaan deg dega ah, balse waxa ay go'ansatay in ay u sheegto halkii uu ka maqli lahaa dadka kale.

Malintii xigtay ayaa ay u wacday oo ay arintii u sheegtay sida ay wax u jiraan.

Wiilkii ayaa saaxibtiis ku yiri" maanta sidaa u socotay ma waxaa bilowday in aad igu ciyarto ee ciyarta iga dhaaf waayo waad ogtahay in aan la'aantaa noolaan karin oo aan mar walibo jeclahay in aan ku arko"

Gabadhii ayaa ku tiri ciyaar ma ahan waa iga dhab hadana waxaa diyaarsan rabaa dalkugalka dalka Kenya waxaana rabaa isbuucyada soo socdo in aan baxo haduu Alle idmo.

Wiilkii ayaa waaga u baryay mana yaqaan waxa uu sameeyo mana awoodo in uu baajiyo safarkeeda mana awoodo in uu la'anteed noolaado.

Gabadhii iyada oo niyada u dajineyso ayaa ay ku tiri "Kaliya muuqeyga ayaa kaa foganaa balse qalbigeyga ayaa kula joogaayo ee samir wax walbo waad la kulmee intaa adduunka joogti hadana nabadee.

Wiilkii ayaa iska soo baxay isaga oo aanan garaneyn halka uu u socdo iyo mesha uu ka yimid isaga dhan waxa uu noqday mid maqane jooge ah balse isaga oo wadadii socdo ayuu wadadii ku miir daboolmay waxana la geyay

isbitaalka waxa uu ahaa mid miir dawolmay oo waxa uu isbitalka ku jiray habeen iyo malin. Balse mid ka mid ardaydii iskuulka la dhiganeysay ayaa gabadhii ku wargalisay xaalada oo uu ku suganyahay saxibkeed balse nasiib xumo uma helin waqti ay ku aado wayo hooyadeed ayaa ku amartay in aysan meel adin. Malintii xigtay wiilkii ayaa isbitalka ka soo baxay waxa uuna imaaday xaafadiisa. Habeenkii ayaa gabadhii wiilka soo wacday una sheegtay in ay bixi rabto malinta isniinta ah una shegtay in ay soo xiriirin doonto hadii ay halkaas tagto xitaa.

Wiilkii ayaa yiri "Ma anaa malin un manka iyo xiskeyga galiyay in aan kla foogaaneeno. Ma anaa manta qabilay xanuunkii aduunka. Malmihii wacnaa miyee mar un isku badaleen murugadii aduunka"

Gabadhii ayaa ku tiri " Ma awoodo in aan ka baqdo safarkaan wayo waxaa rabaa in aan riyadeda rumeyo oo aan yurub tago lana noolado Aabbahee, marka hadii aan calaf isku lee nahay waan is arki doonaa markale.

Waxaa la garay malintii ay safari laheyd gabadhii balse wiilkii waxa uu go'ansaday inta uu arki lahaa iyada oo safareyso oo hawada socoto in uu malintaas oo dhan iska jiifo si uu isku dhaafiyo malintaas mugdiga ah waxa oo soo gatay shan kun oo shilin soomaalia ah oo kaniinika hurdada ah.

Wiilkii ayaa ahaa isbuuc mid aan waxba ogeyn kana qaaday xanuun kale oo uu isbitaal ugaly sida qaldan oo u isticmalay kaniiniyaasha.

Nasiib wanaag wilkii ayaa dib u helay cafimadkiisa balse qalbgiisa iyo mankiisa waxaa ka guuxayo jaceylkii darnaa oo uu u qaday gabadhaas.

Gabadhii ayaa bilowday in ay dib uu soo xiriiriso maalmo ka dib.

Wiilkii ayaa xogaa jawi dagan helay ka dib markii uu maqlay codkeeda.

Wixii ay mudo bil ah xiriiraan ba,

Malintii danbe gabadhii gabar ay ilmo habreed yihiin ayey isku raaceen xaflad oo ay dhiganaayeen asxaabteeda halkaas ayaa gabadhii waxaa ka cashaqay gabdhii ay ilmo habareedka ahaayeen wiil ay asxaab yihiin.

Gabartii ay ilmo habreedka ahaayeen ayaa waxa ay bilowday inay u shukaamiso walaasheed iyada oo ay ku qancineyso in uu yahay wiil lacag leh awoodana wax walbo iyada oo u sheegtay midka mar walbo waqtiga ku dhumineyso uu yahay mid aan awoodin wax uu ku nool yahay Afrika in ay waqtigeeda aysan ku dhuminin mar kale kana faa'ideysato fursadaan,

Gabadhii ayaa qadatay taladii walaasheed iyado oo wiilkii xiriirka u jartay oo ay nolasheda cusub hori u sii wadatay.

Wiilkii ayaa mudo maqlin gabadhii ka wayey qadka balse maalintii dambe ayuu isku dayay in uu fariin u dhaafo balse waxa uu la kulmay arin ka yaabisay ka dib markii lagu dhahay fariin daan ma dirmeyso oo micnaheedu yahay in block ay ka saartay dhamaan aaladahii ay ku wada xiriiri jireen..